Febraayo 12, 2024

# Avondale Stadium ayaa waxaa dib loogu magacaabay in lagu Sharfo Halyeyga Tababare Napoleon B. Cobb

Gobolka DeKalb waxay ku aqoonsatay astaan tabobarnimo iyagoo u magacaabaya Avondale Stadium magaca *Napoleon B. Cobb Stadium at Avondale*, iyagoo u dabaaldagaya nolosha aan caadiga aheyn iyo shaqada Tababare Cobb. Xaflada xiliga 8 da Febraayo waxay aheyd dabaaldag loo sameeyay alaambarin Cobb, kaasoo ku geeriyooday 31 ka Janaayo 80 sanno jir, taasoo u aasteyneyso abaal marin waarta oo saameyntiisa weyn ee ciyaaraha fudud ee dugsiga sare ee Gobolka DeKalb. Qiyaas kasta ha ahaatee, Tababare Cobb wuxuu qof ku xiran u heelan, heer sare, iyo la talinta kubada cagta iyo orodka iyo garoonka, isagoo ku bilaabay mudadiisa uu joogay Dugsiga Sare Gordon ee dabayaaqadii 1970 yadii.

Jabari Cobb, wiilka tababaraha la xusayo, ayaa muujiyay sida ay qoyskiisa uga mahadcelinayaan falkaan deeqsinimada ah, isagoo dib u xasuustay tartanadii xiisaha badnaa iyo guulihii taariiqiga ahaa ee ku dhacay jiheynta aabihiis ee garoonka.

“Avondale Stadium ayaa gaar u ahaa tababare Cobb. Waxaa ka jiray [tartanno badan oo cayaaraha] halkaan u dhexeeyay Gordon iyo Avondale Blue Devils iyo Druid Hills Red Devils,” ayuu yiri Jabari Cobb. “Halkaan ayay soo geli jireen habeenada Jimcaha, oo wuxuu noo sheegayaa sheekooyinkaan wanaagsan ee ku saabsan ciyaarahaan weyn.”

Wuxuu dhameystiray Baajkiisa Sayniska ee Waxbarashada Jireed oo uu ka qaatay Tennessee State University 1964, kadib wuxuu ka shaqo bilaabay macalinnimo iyo tababarnimo Dugsiga Sare DuSable ee Chicago. Sadex sanno kadib, wuxuu u guuray Berkeley, California, halkaasoo uu ka sii waday xirfadiisa waxbarida iyo shaqada tababarka, isagoo diirada saaraya kubada cagta iyo orodka ee Berkeley High.

Ku soo laabashada Tababare Cobb ee Georgia waxaa sabab u ahaa caafimaadka hooyadii oo hoos u dhacayay. La taliye ayaa ku dhiirogeliyay inuu tixgeliyo Dugsiyada Gobolka DeKalb badelkii Dugsiyada Dadweynaha Atlanta (*APS*).

“Wuxuu yiri, ‘Markaad ku soo laabatid Georgia, badelkii aad ka aadi laheyd APS-ka asalkaaga ah, waxaa jiray meel la yiraahdo DeKalb. Waxyaabo weyn ayaa ka dhacaya, oo waxaad u baahantahay inaad timaadid halkaan DeKalb,’” ayuu yiri Jabari. “Xattaa markuu helay fursado uu ku noqdo tababare qaran ee laba wadan oo kala duwan, wuxuu yiri, 'Laakiin waad ogtihiin, waa wax ku saabsan DeKalb.’ Wuxuu jcelaa dhalinyarada Gobolka DeKalb.”

Tababare Cobb iyo xaaskiisa waxay iibsadeen guri u dhow Dugsiga Sare Gordon-hadda Dugsiga Dhexe McNair-oo wuxuu bilaabay inuu wax ka baro oo ku tababaro Gordon sannadkii 1972, isagoo la tababarayay halyey kale oo tababare Gobolka DeKalb, William "Buck" Godfrey. Jabari wuxuu sheegay in aabihiis uu marar badan u sheegay inuu dareemayo in wax weyn ay ka dhacayaan DeKalb, oo muusan rabin inuu seego.

Way adagtahay in lagu doodo natiijooyinka.

Kadib markii uu ku guuleystay sedex koob oo orodka iyo garoonada gobolka, Cobb wuu ka tagay Gordon 1978 si uu u tababaro Morehouse College. Wuxuu halkaas tababaray 11 sanno kahor inta uusan ku soo laaban DeKalb 1989 si uu wax uga baro uguna tababaro Dugsiga Sare Southwest, isagoo dib ula midoobay Godfrey.

Intii lagu jiray shaqadiisii ugu horeysay ee Dugsiga sare Southwest DeKalb, wuxuu ku guuleystay todobo koob oo orodka iyo garoonka wiilasha gobolka oo uu ka caawiyay inuu u diro Terrance Trammell iyo Angelo Taylor Ciyaaraha Olombikada 2000. Gudaha 2004 tii, wuxuu helay fursada uu tababare ugu noqdo Trammell iyo Taylor ee Ciyaaraha Olombikada ee Athens, Greece. Gudaha 2007 dii, wuxuu ka tagay South DeKalb High si uu ugu laabto Morehouse College kahor inta uusan ku soo laaban 2011. Inta lagu jiro waqtigaan, wuxuu u hogaamiyay Panthers laba koob oo gobolka ah kahor intuusan joojinta shaqadiisa xilli ciyaareedka 2016 kadib.

“Dadaaladiisa aan daalka laheyn, labadaba markuu ku jiro iyo markuu ka maqanyahay ciyaarta, waxay saameysay nolosha kuwa uu tababaray. Tababare Cobb wuxuu u ahaa iftiin, nagu hagayo dhinaca waqtiyada mugdiga,” waxaa yiri Taylor. “Sida waafaqsan jiheyntiisa, waxaan ogaanay in guusha aan lagu cabirin kaliya guuleysiga laakin lagu cabiro dabeecada iyo hufnaanta aan muujino markaan ku jirno ciyaarta iyo markaan ka maqannahay.

“Waxaan rabaa inaan u mahadceliyo Cobb oo inuu na aamino, xattaa markii aan ka shakinay nafteena. Garoonka waligiis ha u taagnaado sida marqaati u ah dhaxalkiisa cajiibka ah.”

Wakiilka Gobolka Georgia. Omari Crawford wuxuu ahaa mid kale oo ka mid ah ardayda Cobb kaasoo ku qiimeeyay inuu ka caawiyay inay gaaraan himilooyinkooda wada shaqeeneed iyo rabitaankooda gaarka ah. Wuxuu ku faraxsanyahay in garoon ku yaala gobolka uu matalo inuu lahaanayo magaca tababarahiisa.

“Tababare Cobb wuxuu ka caawiyay kumanaan ciyaartoy dhalinyaro Madow ah inay galaan kulliyada. Si joogto ah ayaan ula hadlay si aan u muujiyo farxadeyda ka qeyb ahaanshaha dhaxalkiisa,” Crawford ayaa yiri. “In kastoo ninkaan uu yahay nin weyn, qof qof walba yaqaan, aad ayaan ugu faraxsannahay adeega uu bixiyay. Waan uga mahadcelinayaa dhaxalkiisa uu ku hormarinayo dhalinyarada sideydoo kale.”

Intii uu shaqadiisa ku jiray, Tababare Cobb ma aheyn kaliya tababare laakin tataliye, saaxib, iyo ku dayasho aabe oo kuwa badan ah. Falsafadiisa tababarnimo waxay dhaaftay meel ka baxsan garoonka orodka iyo kubada cagta, isagoo diirada saaraya dhisida dabeecada, daacadnimada, iyo hormarka guud ee ciyaartoydiisa.

Isku soo wada duub, tababaraha loo dabaaldagay wuxuu ku soo dhameystay shaqadiisa tababarnimo wacdaro 11 koob oo goboleed, horyaalka qaranka, iyo koob 16 gobolka ah. Kulanka horyaalka orodka iyo garoonka Degmada ayaa lagu magacaabay Tababare Cobb.

Tababaraha caanka ah wuxuu helay abaal marino badan iyo bilado ka hor intuusan shaqada ka fariisan. Waxaa loo codeeyay Tababaraha Sannadka ee Ciyaaraha Orodka iyo Garoonka Dugsiga Sare Georgia 10 jeer, oo ay ku sharfeen Ururka Orodka iyo Garoonka Qaranka sida Tababaraha Sannadka ee Orodka iyo Garoonka Goboleedka Southeastern iyo Tababaraha Sannadka ee Garoonka, waxaa loo xushay Tababaraha Sannadka ee Kooxda Orodka Atlanta sadex jeer, oo ay u aqoonsadeen Guddiga Olombikada Mareykanka inuu yahay tababare gaarka ah ee ciyaaraha Olombikada, waxaa la lagu daray Bogga Gaarayaasha Dugsiga Sare ee Southwest DeKalb, oo waxaa la geliyay Bogga Gaarayaasha Tababarayaasha Ciyaaraha Georgia ee 2015.

Xubin ka tirsan guddiga Vickie B. Turner ayaa u dooday Tababare Cobb inuu helo sharaftiisa oo sannoyinka soo socdo ay u tahay qadarin wacdaro ah, dabeecada iyo saameyntiisa qaab nololeedka.

“Markii aan la kulmay xilli ciyaareedkaan nolosha, wuu yara aamusnaa oo aad u daganaa. Laakiin wax walboon ka ogaaday isaga-qof walboo isaga ka hadlay inuu yahay nin weyn,” ayayay tiri. “Waxaan ugu doceynayaa in ruuxiisa ku noolaado kuwa badan oo idinka ah oo halkaan u joogo sababtoo ah waxay noqon laheyd wax laga xumaado haddii [garoonkaan] uu yahay waxa jiroo dhan. Waa inay wax noo laadaan, aan loo dhawaan karin, aan la taaban karin ee sii noolaado, kaasina waa adiga, taasina waa waxa ay carruurteena u baahanyihiin.”

Kormeeraha Guud ee DCSD Dhaqtar Devon Q. Horton abidkiis ma helin fursada uu kula kulmo Tababare Cobb. Si kastaba ha ahaatee, wuxuu muujiyay sida uu ula dhacay kadib markii ogaaday tababaraha iyo saameyntiisa fiican ee ciyaartoyda ardayda DCSD.

“Qaar ka mid ah ardaydiisa hore waxay ku tilmaamaan mid saameyn fiican ku yeeshay noloshooda,” waxaa yiri Dhatqar Horton. “Qaar kale waxay ka hadlaan qaabkiisa gaarka ah ee tababarnimada, iyo qaar kalena waxay xuseen ulajeedkiisa lagu dhisayo dabeecada iyo daacadnimada. Muxuu nin ahaa, Tababare Napoleon Cobb.”

XXX